

QAYBTA SHANAAD.
ANSHAX MARINTA & CIQAABTA.
Qodobka 46aad
HABKA ANSHAX MARINTA.

Lama marin karo Maxbuus anshax marin haddii aanay Waafaqsanayn qaybtan.

Qodobka 47aad
DUNUUBTA YAR-YAR EE LAGU
GALO XABSIGA.

Maxbuus kasta oo gala danbiyadda soo socda, waxaa lagu eedaynayaa danbiyada fudud ee lagu galo Xabsiga:-

- 1) Hadalka wakhtiga shaqada ama sameeya qaylo dheer, qosol iyo hees markastoo xubini amar bixiso, ka dibna uu yeeli waayo.
- 2) La dagaalan Maxbuus kale.
- 3) Markii uu shay reeban qarsado.
- 4) Markii uu muujiyo ixtiraam la'aan lid ku ah xubin ama shaqaale kale oo xabsiga ka shaqeeya ama qof booqasho u yimid xabsiga.
- 5) Caytan ama uu ka qayb qaato hujuum maxbuus kale.
- 6) Si aan run ahayn u jawaaba markii ay Su'aal waydiiyaan xubin ama shaqaale xabsiga ah ama booqde.
- 7) Ka qaada war qoraal ah ama af ahaan, qof ku xad gudbay sharcigan, xeerka iyo amarada madaxda & Tusaale & amar kasta oo daw ah.
- 8) Markuu sheegi waayo danbi ka dhacay xabsiga.
- 9) Samaynta fal ama ku hadalka af ama luuqad wax loogu dhimayo dareenka Maxbuus kale.
- 10) Samaynta fal kasta oo loo baahnayn oo khal-khal gelinaya dareenka & maskaxda maxbuus kasta ama xubin kasta ama shaqaaale kasta oo xabsiga ka shaqeeya.
- 11) Ka taga meesha uu joogo ama meesha uu ku xidhan yahay isagoo aan amar ka helin xubinta.
- 12) Ka taga meesha lagu dawaynayo, barxada ama daarada, meesha uu faylka kaga joro ama meesha loo cayimay in uu seexo.
- 13) War-wareega meelaha Cisbitaalka iyo Barxada ama Daarada, marka ay furan yihiin.
- 14) Ka baaqsada ama diida socodka faylka marka laga tagayo Xabsiga ama lays habaynaayo ama shaqo lagu soo noqonaayo.
- 15) Taga musqusha isaga oo aan amar ka hilin xubin ama wakhti dheer ku jira oo aan loo baahnayn.
- 16) Diida Cuntada xabsiga loo qorsheeyay.
- 17) Cuna ama qaata ama meelaysta cunto uuna lahayn ama ku darsada ama ku kordhista Cuntadiisa, cunto maxbuus kale.
- 18) Ka qaada isaga oo aan amar ka helin xubin cuntotaala qolka cuntada ama meel la dhigay cuntada ama diida amar lagu qaybinayo cunto ama cabitaan.
- 19) Si badheedh ah u daadiya cunto ama u tuura amar la'aan.
- 20) Bixiya ama gada cuntadiisa, cabitaan ama buuri loo ogolaaday in uu ka qaato maxbuus ama qof kale.
- 21) Haddii uu ka baaqsado ama diido dharka la siiyay in uu xidho ama uu maxbuus kale ka bedesho ama lumiyo ama waxyeelo Gaadhsiiyo dharka.
- 22) Haddii uu Cuntada ku tilmaamo wax aan fiicnayn si looga joogsado.
- 23) Haddii uu bedelo ama waji badelo lambar ama calaamad ku dhagsan dharkiisa ama dharka maxbuus kale.

- 24) Haddii uu ka baaqsado ama uu diido in uu isnadiifiyo ama diido in amar lagu siiyo in uu Timaha jaro.
- 25) Ka baaqsado ama diida in uu xafido dharka, bustaha, gogosha ama Nadiifinteeda ama diida amarada la xidhiidha arrintaas ama hantida ee aan isaga khusayn.
- 26) Farafareeya ama faraha la gala albaabada, laydhka ama hanti isaga khusayn.
- 27) Qaata dharka xabsiga ama dharka Maxbuus kale.
- 28) Gala wax aanu shuqul ku lahayn ama wax bilaa micna ah xabsiga dhexdeesa ama qayb ka mid ah.
- 29) Ku tufa candhuuf ama ciideeya albaabka, Darbiga, Guryaha dhexdooda ama qayb ka mid ah Xabsiga ama shay Xabsiga yaal.
- 30) Waxyeelo u gaysta dhirta ku dhextaal xabsiga.
- 31) Wasakheeya Gidaarada, Musqulaha & Meesha lagu Maydho.
- 32) Ka baaqda ama diida in uu xafido dhamaan allaabta xabsiga ee lagu aaminay.
- 33) Ka baaqsada ama diida in uu si macquul ah u xafido ama khasaare gaadhsiiya ama qaata qalab shaqo oo lagu aaminay.
- 34) Ka baaqsada in uu soo sheego markiiba lumid kasta, jabin ama khasaare ama dhaawicid geystay hantida iyo qalabka xabsiga
- 35) Samayn shay kasta iyadoo uuna ka helin ogolaansho sarkaalka madaxda ah.
- 36) Samayn fal uu wax kula qayb sanayo Maxbuus kale ama ka caawiya fal uu gaysanayo maxbuus kale.
- 37) Qayb ka qaatay fal uugaystay Maxbuus kale.
- 38) Ku khalda ama ku siyaadiya qalabka iyo allaabta shaqada wax dibada laga keeno.
- 39) Isticmaalka hadal cay-ama dhaar ah ama ilaaq Tahdiid ah ama lagu Caayo af kale.
- 40) Sababa ama ka baaqda in uu gacan ka gaysto in laga hoos tago fidmada iyo amar Diidka.
- 41) Ku kaca Akhlaaq xumi, Nidaam xumida iyo Damiir la'aan.
- 42) Ka Baaqsada ama diida in uu caawiyo xubin haddii uu maxbuus isku dayo in uu baxsado ama uu damco in uu dhibaato u geysto xubin.
- 43) Amar diido uu ku sameeyo xubin ama shaqaalaha kale ee xabsiga.
- 44) Markuu sameeyo shaqo joojin ama uu diido in uu shaqo qabto ama muujiyo caajisnimo & daayaacnimo shaqada uu hayo dhexdeeda.
- 45) Dhalan bedel ama dhaawicid Gidaaradda, Qalabka & Hantida Xabsiga.
- 46) Isagoo been sheegaya iska dhiga ama isu eekaysiiya Bukaana.
- 47) Diida ama Tirtira Daawaynta Dhakhtarka.
- 48) Haysashada shay la Mamnuucay, Cunto, Lacag, Dhar, Kayd, Khamro, ama Mukhadraad, Buuri, Xarfo, Wargado, Dawo & Shay kasta oo aan loo Ogolayn.
- 49) Falkasta oo kale ama ka Baaqsi ka hor imanaya Nidaamka Fiican & Anshaxa Wanaagsan.
- 50) Isku daya Galida ama Gacansiinta ama Dhiiri geliya, Samaynta Danbiyadda aan soo sheegnay.

Qodobka 48aad
DUNUUBTA CULCULUS EE LAGA
GALO XABSIGA.

Maxbuus kasta oo gala dambiyada soo socda, waxaa lagu eedaynayaa dunuubta culculus ee laga galo Xabsiga:-

- 1) Hujuum wadajir ah & Xiisad kicin Abaabulan;
- 2) Baxsi ama isku dayid baxsi;
- 3) Kaqayb qaato Aflagaado & Weerar xubin;
- 4) Cusleeya ama ku celiya aflagaado maxbuus kale;
- 5) Si badheedh ah u burburiya hantida Xabsiga;
- 6) Si badheedh ah bukaan isugu rida, dhaawac ama awood la'aan;
- 7) Ku khalda ama ku siyaadiya qalabka & alaabta shaqada wax debadada laga keenay;
- 8) Isticmaalka hadal cay ah ama dhaar ama Ilaaq ama Tahdiid ama lagu Caayo qof kale;
- 9) Sababa ama ka baaqsada in uu gacan ka gaysto in laga hortago fidnada & Amardiidka;
- 10) Ku kacaAkhlaaq Xumi, Nidaam Xumi, & Damiir La'aan;
- 11) Ka Baaqsada ama diida in uu Caawiyo Xubin hadii uu Maxbuus isku dayo in uu baxsado, ama uu damco, ama uu damco in uu dhibaato u gaysto xubin;
- 12) Amar diid uu ku sameeyo Xubin ama shaqaale kale oo Xabsiga ah;
- 13) Markuu sameeyo shaqo joojin ama uu diido in uu shaqo qabto ama muujiyo Caajisnimo & Layaabnimo Shaqada uu hayo dhexdeeda;
- 14) Dhala gedi ama dhaawicid Gidaaradda, Qalabka & Hantida Xabsiga;
- 15) Isagoo been Sheegaya iska dhiga bukaan ama isu eekay siiya bukaan;
- 16) Diida ama tirtira Daawaynta Dhakhtarka;
- 17) Si badheedh ah been u sheega ama masabid ku sameeya xubin ama qof kale oo shaqaale ka ah xabsiga;
- 18) In uu Caadaysto Dunuubta Yar-yar Gelidooda, oo had & jeer lagu Ciqaabo;
- 19) Akhlaaq Xumo weyn & Adeecid La'aan weyn;
- 20) Ku xad gudub wayn ama qofka oo lagu weeraro xubin ama shaqaale kale oo xabsiga ah;
- 21) Wax rabshid & Qasid markii wax la Ciqaabaayo si uu u rabsho nidaamka Xabsiga;
- 22) Isku daya in uu Caawiyo ama gala Dambiyadda la soo Sheegay;

Qodobka 49aad
WEYDIINTA LA XIDHIIDHA
DAMBIYADA LAGA GALO XABSIGA

- 1) Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu amri karaa, in meel gaar ah lagu hayo Maxbuuska gala Dambiyada laga galo Xabsiga;
- 2) Maxbuus kasta oo lagu eedeeyo Dambi, waa in la Ogaysiiyaa dambiga lagu eedaynaayo waana in uu isu daafacaa sidan:-
 - A) Dhagaysi & Su'aalo waydiin la xidhiidha Markhaatiga.
 - B) Cadayn uu qoro ama Sameeyo.
 - C) Dalbida Markhaatiga wax ka taraaya Arintiisa & Keenista Qalabka Dambi muujinta oo Sarkaalka eedaas Jeedinayaa uu keeno, Maxbuusku Dambiga ha galo ama yuu geline.
- 3) Eed kasta oo loo jeedsho Maxbuuska, waa in war bixinteeda la siiyaa Taliyaha Daahid La'aan.

Qodobka 50aad
CIQAABTA DAM-BIYADA FUD-FUDUD
EE XABSIGA.

Sarkaalka Madaxda ah, oo dhagaysta eedan Maxbuuska, wuxuu amri karaa Ciqaab la Xidhiidha Maxbuuska Dambiilaha ah, iyada oo uu maraayo hal ama ka badan Ciqaabaadkan soo socda:-

- A) Ciqaab Raashin & Sheelo ama Sheelo La'aan mudo aan ka badnayn 4 Cisho.
- B) Xabsi dhimista oo laga daayo mudo aan ka badnayn 14 Cisho.
- C) Kajaridda wax yaabaha Mudnaanshaha (PRIVELEGES);
- d) In la jaro haddii ay jirtay, in Maxbuusku lacag dhigtay Xabsiga, khasaaraha uu u geystay qalabka Xabsiga ama uu dayacay.

Qodobka 51aad
CIQAABAADKA CULCULUS EE
DAMBIYADA XABSIGA.

Sarkaalka Madaxda ah ama Sarkaal kasta oo uu soo magacaabo Taliyuhu markii uu wax weydiyo ka dib, wuxuu amri karaa in Maxbuuska la ciqaabo hal ama ka badan Ciqaabta soo socota:-

- A) Sheelayn iyo cunto ciqaabid ama iyaddoo aan la samayn cunto ciqaabida mudo aan ka badnayn 21 Cisho iyo waayida Xabsi dhimida mudadaas.
- B) Ka jarida Xabsi dhimida mudo aan ka badnayn 28 Cisho.
- C) Jarida waxyaalaha dheeraadka ah.
- D) In laga jaro haddii ay jirto Maxbuusku lacag uu dhigtay Xabsiga, khasaaraha uu u geystay qalabka Xabsiga ama uu dayacay.

Qodobka 52aad
ARRIMAHA QAARKOOD EE TALIYAHA
LOO WAREEJIN KARO.

Sarkaalka Madaxda ahi wuxuu yeeli karaa, marka ay jiraan Xaalad aan Caadi aheyni in uu arimaha u wareejiyo Taliyaha marka Maxbuuska lagu eedeeyo Dambiyo Culus oo uu ka galay Xabsiga, Taliyaha oo Awoodi kara inuu baadho Arrintaas ama Sarkaal kale u xil saaro arrintan.

Xaaladaas Taliyaha ama Sarkaalka arinta loo xil Saaray, wuxuu amri karaa in lagu Ciqaabo Maxbuuska dambiga Culus galay hal ama ka badan Ciqaabta soo socota:-

- A) Sheelayn ay la socoto ciqaab cunto ama laga dhaaf mudo aan ka badnayn 30 Cisho iyadoo aan Mudadaas loo tirin Xabsidhimis.
- B) In laga jaro Xabsi dhimista mudo aan ka badnayn 90 Cisho.
- C) In laga jaro waxyaabaha dheeraadka ah.
- D) In laga jaro haddii ay jiraan Maxbuusku lacag uu dhigtay khasaaraha uu u geystay qalabka Xabsiga ama uu dayacay ----